

Cabashadaydu ma Title IX baa?

Title IX, waxaa hoos yimaada laba nooc oo kiisas ah:

ANSHAX-XUMADA GALMADA


Eray weyn oo loo isticmaalo in lagu soo koobo dhaqamo kala duwan (Tacaddi galmo, xadgudub galmo, rabshad shukaansi ama dabagal)

AMA

TAKOORKA

Si kala duwan loola dhaqmo iyadoo ay ugu wacan tahay jinsiga/jinsi ahaan

Haddii aad qabto cabasho ka mid ah kuwa hoos yimaada Title IX, raac talaabooyinkan.



01 WARBIKIN

U samee warbixin maamulaha dugsi, kaaliyaha maamulaha ama Iskuduwaha Title IX ee degmada. Waxaad soo diri kartaa iimayl ama waxaad buuxin kartaa [foomka cabashada ee onlaynka ah](#). Marka warbixin ama cabasho ku saabsan Title IX ay hesho degmadu, degmadu waxay dib u eegi doontaa macluumaadka si ay u go'aamiso sharciga khuseeya ka dibna raacdo nidaamka ku habboon.

02 OGAYSIIS

Marka la helo cabashada rasmiga ah, qofka ku weeraray ama ku dhibaateeyay (Dacweysane) waxaa la ogeysiin doonaa in cabashada Title IX laga gudbiyay iyaga iyo in baaritaan uu bilowday. Waxaa la siin doonaa cabashadaada oo kooban.

03 BAARITAANKA

Waxa kaa waraysan doona wixii dhacay baare. Si gooni ah, dacweysanaha ayaa loo waraysan doonaa. Waxaad heli doontaa sida aad uga jawaabtay su'aalaha waraysiga oo kooban ee baaraha, oo loo yaqaan Warbixinta Kooban. Waxa kale oo aad heli doontaa Qoraal Kooban oo gooni ah oo ka yimi dacweysanaha. Baaraha ayaa soo saari doona warbixinta ugu danbeysa ka hor dhageysiga. Degmadu waxay tixgalin doontaa in cadaymaha la soo ururiyey ee habka baadhista ay go'aaminayso in cabashada la sheegay ay aad ugu dhowdahay in aanay dhicin.

04 GO'AAN

Ku-xigeenka kormeeraha guud ama maamulaha fulinta ayaa samayn doona go'aanka kama dambaysta ah ee ku saabsan in dacwaysanuhu masuul ka yahay iyo in kale. Haddii uu mas'uul ka yahay, cawaaqibka ama anshaxa ayaa lagu soo saari doonaa eedaysanaha. Tallaabooyinka edbinta waxaa ka mid noqon kara:

1. Anshax marinta ilaa iyo ay ku jiraan cayrinta maalmo kooban iyo cayrinta guud.
2. Ka saarida hawlo kala duwan, guddiyo ama jagooyin kala duwan.
3. Inuu u qalmi waayo abaal-marinnada iyo maamuuska.
4. Anshax marinta ilaa iyo ay ku jiraan joojinta, si waafaqsan sharciyada, heshiisyada, qandaraasyada iyo hand books-ka.

